



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

**DHISIDDA GUDDI-HOOSAADKA ILAALINTA, HUFNAANTA IYO
SUMACADDA GOLAHA SHACABKA**

Muqdisho, 4th February 2015

A handwritten signature in black ink, consisting of stylized cursive letters.

GOLAHA SHACABKA:


- Markuu Arkay:** Qodobka 68 (2) ee Dastuurka sida ku-meel gaarka ah loo ansixiyey;
- Markuu Arkay:** Qodobada 56^{aad} iyo 57^{aad} ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Qiimeeyay:** Baahida loo qabo sare u qaadidda xiriirka Golaha iyo Shacabka uu wakiilka ka yahay;
- Markuu Garawsaday:** Saamaynta ay leedahay Sumcadda iyo Hufnaanta goluhu xag siyaasadeed iyo xag dhaqanba wadaroggol ku guddoonsaday sida soo socota:

Golaha Shacabka wuxuu soo saaray Qaraarkan:

1. Golaha Shacabku wuxuu dhisay Guddi-hoosaad mas'uul ka ah Ilaalinta Hufnaanta iyo Sumacadda Golaha Shacabka.
2. Guddi hoosaadka Ilaalinta Hufnaanta iyo Sumcadda Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu leeyahay hawlaha iyo mas'uuliyada soo socota;
 - a. Inuu u kuurgalo uuna ilaaliyo dhaqan wanaagga xubnaha Baarlamaanka iyagoo u gudbinaya warbixinno joogta ah Guddoonka Golaha Shacabka dhacdooyin xadgudub ku ah dhaqan wanaagga oo ay geystaan xubnaha Baarlamaanka;
 - b. Inuu baaro eedeymaha la xiriira dhaqan xumo, musuqmaasuq, ama wax-is dabamarin ee xubin kasta ee Golaha iyo cid kasta oo dhinac ka ah ee deymahaa;
 - c. Sidoo kale guddigu wuxuu baarayaa cid kasta oo si toos ah ama dadban iisugu dayda in ay wax u dhinto hufnaanta iyo sumcadda Barlamaanka ayagoo adeegsanaya wax-isdabamarin iyo wixii la mid ah si ay u garaan dano gaar ah;
 - d. Inuu u diyaariyo Guddoonka Golaha Shacabka talooyin ku aaddan go'aan ka gaarista ee deymaha la xiriira dhaqan xumida ama wax-isdabamarsinta ee ku xusan faqrada (b) iyo (c) ee qodobkan:



- e. Inuu dejiyo qorshe lagu hormarinayo hufnaanta loogana hortagayo wax-dabamarinta Xubnaha Golaha Shacabka;
 - f. Inuu ka caawiyo Golaha Shacabka dejinta qorshe lagu hormarinayo xiriirka dadweynaha iyo sare u qaadidda sumcadda Barlamaanka iyo kalsoonida shacabka ay ku qabaan howlaha Baarlamaanka.
 - g. Inuu ka caawiyo Golaha Shacabka horumarinta qorshaha wacyigelinta dadweynaha ee ku xusan Faqradda (e) ee Qodobkan.
 - h. Guddigu wuxuu talooyin ama xog waydiisan karaa guddi ama xubin Baarlamaan iyo hay'ad dawladeed, mid gaar ah, ama cid kasta si uu hawshiisa u guto.
3. Xubanaha Guddi-Hoosaadka Ilaalinta, Hufnaanta Iyo Sumacadda Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya magacyadooda waa kuma hoos ku xusan:
1. Xil. Cabdisamad Maxamuud Xasan
 2. Xil. Maxamuud Cabdi Xasan (Beekos)
 3. Xil. Axmed Aadan Cabdiraxmaan
 4. Xil. Bashiir Maxamed Jaamac
 5. Xil. Bashiir Caddow Calasow
 6. Xil. Maryan Aweys Jaamac
 7. Xil. Ibraahim Cali Cumar
 8. Xil. Cabdicasiis Cabdulaahi Maxamed
 9. Xil. Cabdi Xaashi Cabdullaahi
 10. Xil. Aadan Sadiiq Maxamed
4. Qaraarkan wuxuu dhaqangalayaa laga bilaabo maalinta uu Goluhu ansixiyo.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

